

Adeega la talinta dugsiga

Macluumaadka loogu talagalay xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta

Dhammaan dugsiyada dadweynaha ee NSW waxay isticmaali karaan taageerada cilmi nafsiga iyadoo la adeegsanayo adeega la talinta dugsiga.

Adeega la talinta dugsiga waxaa ka mid ah la taliyayaasha dugsiga iyo xirfadlayaasha cilmi nafsiga dugsiga ee bixiya la talinta, adeegyada kala dhexgalka iyo qiimeynta cilmi nafsiga ee ardayda laga bilaabo uulada ilaa Fasalka 12-aad. Waxay la shaqeeyaan qoysaska, shaqaalaha dugsiga, iyo xirfadlayaasha kale si ay u taageeraan baahida waxbarashada, caafimaadka maskaxda iyo fayoaqabka ardayda iyo inay abuuraan jawi taageero oo waxbarasho, caafimaad iyo amaamba leh.

Dhammaan shaqaalaha dugsiga waxay leeyihiin shahaadooyin ka dambeeyey shahaada koowaad ee cilmi nafsiga waxay inta ku dabaqaan khibradooda dabeecada, waxbarashada iyo caafimaadka maskaxda si ay u caawiyaan carruurta iyo dadka dhalinyarada ahi u guuleystaan aqoon, bulsho, dabeecad iyo dareen maskaxeed ahaan.

La taliyaha dugsiga ama xirfadlaha cilmi nafsiga dugsiga wuxuu awoodaa:

- bixinta la talinta loogu talagalay ardada
- qiimeynta waxbarashada ardayga iyo baahida caafimaadka maskaxda
- ula shaqeynta macalimiinta iyo shaqaalaha takhasuska leh si iskhaashi leh
- caawinta qoysasku inay fahmaan oo maareeyaan baahida caafimaad maskaxeed iyo waxbarashada carruurtooda
- la shaqeynta hay'adaha bannaanka ka ah iyo xirfadlayaasha caafimaadka maskaxda si ay u siiyaan taageero wada socota oo xiriirsan oo loogu talagalay ardayda shakhsi ahaaneed.

Markay la shaqeynayaan ardayda, waalidiinta ama xannaaneeyayaasha iyo macalimiinta, shaqaalaha la talinta dugsiga ayaa sharxi doona siday u shaqeeyaan, si taxatar leh u dhageyso waxa la yiraahdo, oo kaa caawin kara tallaabooyinka kuu barnnaan oo dhiirigelin doona qaadashada go' aan wax ku ool ah.

Qarsoonaan

Shaqaalaha la talinta dugsiga waxay siiyaan taageero cilmi nafsiyeed qarsoon oo ikhtiyaari ah ardayda. Macluumaadka qarsoon lalama wadaagi doono cid kale ardayga, waalidka ama xannaaneeyaha ogolaashihiisa mooyee iyo in sharcigu u baahdo mooyee ama laga hortegayo khatar daran oo ku socota fayoaqabka ama amaanka.

Gudbin

Mudnaanta taageerada la talinta dugsiga waxaa lagu gaaraa iyadoo lala tashanayo kooxaha fayoaqabka iyo waxbarashada dugsiga. Waalidiinta ama xannaaneeyayaasha su' aalo ka qaba waxbarashada ilmahooda, caafimaadka maskaxda iyo/ama fayoaqabka waxay codsan karaan ballan iyagoo dugsiga la soo xiriiraya. Ardaydu sidoo kale iyagaa isasoo gudbinaya ama caawimaad ka raadsanaya waalidiinta ama shaqaalaha waxbara si ay ballan u sameeyaan.

Adeega turjumaanka taleefanka

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad intaas ka badan fadlan wac dugsiga. Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya weydiintaada, fadlan ka wac Adeegga Turjumaanka taleefanka 131 450 kuna weydiiso turjumaan luuqadaada ah.

U sheeg xiriiriyaha lambarka aad dooneysid inaad wacdid, xiriiriyahaana Khadka soo gelin doona turjumaan kaa caawiya wada hadalka. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.